Disability Rights OHIO

# XAASHIDA 1-AAD EE TALOOYINKA U-DOODISTA

## SIDEEN WAXBARASHADA QAASKA AH UGU HELI KARAA ILMAHAYGA?

### I. TALLAABADA KOOWAAD: QIIMEYN

Dugsigu waa inuu sameeyaa qiimeyn bilow ah (mararka qaarkood loo yaqaan qiimaynta dhowr arimood (multi-factored evaluation, MFE)) si loo go'aamiyo u-qalmitaanka barnaamijka waxbarashada la shakhsiyeeyay (individualized education program, IEP).

> **Talo:** In kasta oo dugsigu leeyahay waajibaad sugan (child find) si uu u ogaado oo u qiimeeyo carruurta, kula tali waalidka inuu codsiga qoraal ku soo qoro. Tani waxay gacan ka geysaneysaa sameynta waqtiyo/jadwal.

Qiimaynta hore waa in la sameeyaa haddii dugsigu hayo sabab looga shakiyo in ilmuhu qabo naafonimo oo uu u baahan yahay waxbarasho qaas ah.

> **Talo:** Ohio waxay ogolaataa jawaabo ku aadan habka faragelinta. Tani waxay u ogolaanaysaa dugsigu inuu fasalka dhexdiisa ka hirgeliyo qabatimyo aan rasmi ahayn ka hor inta aan la samayn qiimaynta bilowga ah. Kula tali waalidiinta inay fiiro dheer u yeeshaan habkan aan dib u dhigi karin wakhtiyada qiimaynta rasmiga ah ee dheeriga ah haddii uu waalidku codsado.

Dugsiga qasab ku ma aha inuu sameeyo qiimaynta bilowga ah haddii aanu ka shakin in ilmuhu naafonimo qabo.

> **Talo:** Dugsigu waa inuu siiyaa waalidka ogaysiis hordhac ah oo qoraal ah (PR-01) 30 maalmood gudahooda laga bilaabo xiliga codsiga waalidka ee ku aadan qiimaynta haddii uu diido inuu qiimeeyo maadaama uusan ka shakisneyn naafonimo.
>
> **Talo:** Ka codso dugsiga inuu sidoo kale go'aamiyo in ilmuhu u qalmo Qorshaha 504 kaas oo bixin kara adeegyada waxbarashada qaaska ah iyo qabatimyo/beddelaadyo.

Qiimaynta bilowga ah waa in lagu sameeyaa 60 maalmood gudahooda laga bilaabo xiliga ogolaanshaha waalidka ee ku aadan qiimaynta.

## II. TALLAABADA LABAAD: GO'AAMI U-QALMITAANKA

Kooxda qiimaynta ayaa la kulmayo waalidka si ay ugala hadlaan natiijada qiimaynta. Natiijooyinka qiimaynta ayaa lagu ururinayaa dukumeenti la yidhaahdo warbixinta kooxda qiimaynta (evaluation team report, ETR).

ETR waxay qeexaysaa awoodaha iyo baahiyada ilmaha waxayna noqotaa aasaaska go'aaminta kooxda in ilmuhu u qalmo waxbarashada qaaska ah marka la eego mid ka mid ah qaybaha u-qalmitaanka iyo in kale (tusaale, naafonimo waxbarasho oo gaar ah (SLD), dhibaatooyinka kale ee maqalka (OHI), autism, iwm.).

Haddii la ogaado in ilmuhu aanu u qalmin, waalidku waxay raadsan karaan qiimayn waxbarasho oo madaxabanaan (independent educational evaluation, IEE) iyadoo kharashka ay bixinayso degmada dugsiga, ama waxay raadsan karaan xal.

Haddii ilmuhu u qalmo, tallaabada xigta waa sameynta IEP.